



Shaqaalaa Sumaynta Cayayaanka

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).



Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. *Tilmaamahaan kormeerka ganacsigaaga gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.*

Shuruudaha Guud

Qaacidada

- ❑ Iskudarka sunta cayayaanka waa in lagu sameeyo goobta shaqada.
- ❑ Keliya iskudar oo adeegso waxa aad ugu baahan tahay hal shaqo.

Application

- ❑ Xaqiiji in qalabku uu siidaynaayo cadadka ku haboon ee sunta cayayaanka.
- ❑ Ku shub sunta cayayaanka meesha loogu talagalay ilaa inta suuragalka ah.
- ❑ Haku shubin sunta cayayaanka inta lagu jiro ama kahor xiliyada cimiladu isbadelayso ayna ku jiraan xiliga dabaysha ama roobka keenaaya in sunta cayayaanku ka yaacdo ama ka leexato aaga loogu talagalay.
- ❑ Raac tilmaamaha ku qoran daawada sunta cayayaanka si aad u hesho tilmaamaha adeegsiga iyo daadinta saxda ah. Si joogto ah u akhri una calaamadee sharciyada sunta cayayaanka maadaama tilmaamaha sunta la badeli karo.


tilmaamo dheeraad ah >>>

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



Codsiga

- Ka fiiri tilmaamaha sunta, sharciyada maxaliga ah, iyo xeerarka quseeya Qalabka Difaaca Shaqsiga (PPE) e saxda ah. Agabka PPE da ee guud waxaa kamid ah gacmo gashiyada ka hortaga kiimikada, ookiyaalaha difaaca indhaha, shulugyada difaaca, qalabka neefsiga, kabaha difaaca, iyo koofiyada difaaca madaxa.
- Bar shaqaalaha sida qaab sax ah loogu akhriyo tilmaamaha loona raaco tilmaamaha PPE da.

Kaydka iyo Gaadiidka

- Ku xaree sunta cayayaanka aaga loo sameeyay oo ka fog baraha biyaha iyo marinnada daadka.
- Geli sunta cayayaanka qasabyada loogu talagalay. Haddii Qasaca waxyeelo ku dhacdo, geli agabka qasac amaan ah oo leh tilmaamaha asalka ah.
- La soco heerkullada daran inay keeni karaan is kiimikadu isku badesho sunta cayayaanka. Xaqiiji in sunta cayayaanka lagu xareeyo meel qaboow oo qalalan.
- Ku qaad sunta cayayaanka meelaha xamuulka ee gaariga. Ka fogee darawalka iyo rakaabka meelaha sunta cayayaanku saaran tahay oo gaarigu ha lahaado hawo.
- Marka gaariga lagu wado, Ku xaree sunta cayayaanka qasacyo caag ah oo loo sameeyay in lagu qaado keliya. Hayso kiishada PPE da iyo agabka khatarta ah ee daata marka aad gaariga ku wado sunta cayayaanka.

Tuurista qashinka

- U fogee wasaqda sunta cayayaanka si waafaqsan tilmaamaha ku qoran aalada.
- ! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO).
Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.

Waad ku mahadsan tahay

inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.